

Qodobka 257aad

Cabashada fadhiga dooddha iyo ogeysiinta dhinacyada

Guddoomiyaha Maxkamadda wuxuu qabanayaa fadhi lagaga doodo cabashada, Kaaliyaha Maxkamaddana wuxuu ogeysiinayaa dhinacyada 10 maalmood ka hor ugu yaraan.

Qodobka 258aad

Akhrinta Dacwadda iyo Dooddeeda

Garsooraha uu magacaabay Guddomiyaha ayaa fadhiga loo qaatay Dacwadda kaga sheekeynaaya kaddibna Guddomiyaha ayaa u oggolaanayo dhinacyada inay caddeestaan asbaabta cabashada iyo disaacooda.

Markii ay dooddu dhammaato, Maxkamaddu waxay go'aankeeda ku gaareysaa qolka tashiga, haddii ay la habboonaan Guddomiyaha inuu dib ugu dhigo fadhi kale.

Qodobka 259aad

Go'aanka Maxkamadda Sare

Haddii la helo asbaabta cabashada ee Sharcigu sheegayo Maxkamadda waxay caddeynaysaa oggolaasha la'aanta ama socodsiin la'aanta cabashada waxayna amreysaa in lala wareego damaanaadji tiil, waxayna xukumeyssaa kharajka.

Man a bannaana in la soo celiyo cabashadii Maxkamaddu horey u caddaysay in aan la oggolaan ama la socodsiin xataa haddii ayna muddada duriddu dhammaan.

Haddii ay Maxkamaddu garato in ayna bannaanayn in la oo Dacwadda ama la sii wado waxay go'aan ku gaareysaa tirtiridda xukunka la soo duray.

Haddiise ay Maxkamaddu diido cabashada waxay ku xukumeyssaa dhinaca wax duray inuu waayo dammaanadda iyo kharajka haddii ayna la noqon in dhinac kasta qaado kharajkiisa.

Hadjiise ay oggolaato cabashada waxay burineysaa xukunka la soo duray, waxayna si kama dambays ah u dhammeyneysaa dulucda Dacwadda markii ay caddahay in diyaarinta Dacwaddu ay buuxdo, haddii kalase waxaa u bannaan in ay baadho arrimaha Dacwadda ama amarto qalab baarid oo kale ama u celiso Maxkamadda xukunka soo saartay haddii ay jirto dan aad u culus iyadoo amreysa in uu galo Garsoore aan ahayn kii horey u galay.

Qodobka 260aad

Dhigidda xukun & gaarsiintiisa

Xukunka waxaa la dhigayaa Xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda; Kaalijuhuna wuxuu gaarsiinaya dhinacyada danta ku leh; wuxuuna u celinayaa galka oo ay ku jiraan warqadaha oo idil yo nuqul ka mid ah dhawaaqa xukunka Maxkamaddii soo saartay xukunka la duray taasoo ay waajib ku tahay in ay ku tilmaanto geeska xukunka la soo duray dhawaaqa xukunka Maxkamadda Sare.

Qodobbada 261aad

Ka noqoshada cabashada

Waxaa u bannaan dhinac kasta in uu ka tanaasulo cabashada ama jawaab celinteeda inta aan la billaabin akhrinta Dacwadda ee lagu sheegay Qodobka 258.

Qodobka 262aad

Dhaqaaajinta Dacwadda

Haddii ay Maxkamadda Sare u wareejiso Dacwadda Maxkamadda kale waxaa u bannaan dhinac kasta in uu Dacwadda ka hor wado Maxkamadda loo wareejiyey sannad dhexdiis laga billaabo markii la faafiyey xukunka Maxkamadda Sare.

Xukunka Maxkamadda Sare wuxuu lahaanayaa xooggiisa laasimka ah xataa haddii ay dacwaddu dhacdo.

Qodobka 263aad

Qaadidda Dacwadda la celiyey

Dhinacyadu dacwaada la wareejiyey waxay ka hor lahaanayaan Maxkamadda dacwadda loo wareejiyey sifooiyinkii ay ka hor lahaa-yeen Maxkamaddii hore.

Qodobka 264aad

Xoogga Qaunuunka ah ee Go'aanka Maxkamadda Sare

Waxaa waajib ku ah Maxkamadda Dacwadda loo wareejiyey in ay raacdoo arrimaha qaunuuniga ah ee Maxkamadda Sare wax ka goysay.